Qoysaska Dugsiyada Magaalada Columbus ee sharafta leh,

Waalidiinta iyo ilaaliyayaasha waxay maalmahan la kulmaan waxyaabo badan oo dhacaya, sugitaanka basaska daahayna waxay noqon kartaa wax ka badan oo niyad jab ah. Waalid ahaan, waan fahmay oo waxaan la kulmay walaacyo la mid ah kuwa idinka mid ah ay qabaan bilihii la soo dhaafay. Waxaan rabaa inaad ogaato inaan maqalnay wicitaanadaada iyo walaac-yadaada ku saabsan xiriirka iyo ogeysiisyada basaska daahay. Waxaan sameyneynaa isbeddel si aan u wanaajino.

1-da-Noofeembar, Dugsiyada Magaalada Columbus (Columbus City Schools) waxay soo ban-dhigayaan "Gaadiidkayga ku aadan Fasalka Xanaanada ilaa Fasalka 12-aad" (My Ride K-12") si ay u fududeeyaan helitaanka xoggta gaadiidka, ayna ku soo gaarsiiyaan warar iyo cusbooneysiin waqtigeeda ku habboon oo ka imanaya kooxdeenna Gaadiidka. Waxaadna ku adeegsan kartaa nidaamkan cusub ee ogeysiiska taleefoonka casriga ah (smartphone) ama kombiyuutarka, iyada oo loo marayo Codsiga (Abka) ama mareegta (websayt-ka).

Qoys kastaa wuxuu mudan yahay inuu helo xogg cad oo waqtiyeysan oo ku saabsan gaadiidka ilmahooda, gaar ahaan marka dib u dhacu uu saameyn ku yeelan karo in si nabad ah loogu celiyo guryahooda. Waxaan aaminsanahay in nidaamkan cusub uu aad u-fiicnaan doono uuna ku siiyo xoggta aad u baahan tahay marka aad u baahato.

Iyada oo loo marayo ab-ka My Ride K-12 iyo mareegaha, qoysasku waxay dib u eegi karaan faah-faahinta gaadiidka ilmahooda waxayna ka heli karaan ogeysiisyo qoraal ah oo ku aadan aaladaha moobaylka (mobile devices) oo ku saabsan dib u dhaca wadada baska dugsiga, isbeddellada, iyo cusbooneysiinta jadwalka. Inaad xoggtan hal meel ku haysato waxay kaa caawin doontaa inaad qorsheysato maalintaada oo aad la socoto marka isbeddello dhacaan.

My Ride K-12 waxay fududaysaa helitaanka xoggta waxayna siisaa qoysaska fahan cad oo ku saabsan waqtiyada uu ilmuhu bas-ka raacayo iyo marka uu ka degayo; taas oo lagu ogeysiiyo qoysaska marka ardaygu uu kaarka aqoonsiga ardaynimo u marsado mashiinka saaran bas-ka, xilliga uu raacayo iyo marka uu ka degayo labadaba. Nidaamkan cusub wuxuu sidoo kale taageeraa isla xisaabtanka iyo hufnaanta heer sare ah oo ku aaddan Waaxdeenna Gaadiidka.

In kasta oo bad-qabku uu yahay mudnaanta koowaad ee ilmo kasta oo taga kana soo noqda Dugsiyadeenna Magaalada Columbus, Hagaajinta xirirka isgaarsiinteenna iyo heerarka adeeggeenna ayaa sidoo kale aad muhiim u ah. In kasta oo aan aaminsanahay in My Ride K-12 uu waxtar yeelan doono, kooxdeenna Gaadiidka ayaa diyaar u ah inay ka jawaabaan su'aalaha oo ay gacan ka geystaan xalinta walaac-yada, iyadoo laga wacayo lambarka 614-365-5074.

Jawaab celin-taada waa mid qiimo leh marka aan hirgelinno nidaamka cusub, waxayna naga caawin doontaa inaan sii wadno horumarinta nidaamka waqti ka dib. Fadlan ha ka laba-labeyn inaad noo soo dirto wixii su'aalo ah ama walaac ah; Xoggta noocan oo kale ah waxay gacan ka geysataa horumarinta waayo-aragnimada dhammaan ardaydeenna iyo qoysaskeenna.

Fadlan adeegso hagaha hoose (guide below) si aad u sameysato akoonkaaga, aadna ug darto ilmahaaga, oo aad u suurto-geliso ogeysiisyada qoraalka ah.
Waad ku mahadsan tahay iskaashigaaga iyo inaad ku kalsoon tahay Dugsiyada Magaalada Columbus ee ah taageerada safarka bad-qabka leh ee ilmahaaga uu ku aadayo dugsiga kagana soo laabanayo.

Si daacad ah,

Dr. Angela Chapman
Kormeeraha Guud / Madaxa Fulinta, Dugsiyada Magaalada Columbus
(Superintendent / CEO, Columbus City Schools)

Dugsiyada Magaalada Columbus
Hage-Adeegsade loogu talagalay Qoysaska ee ku aadan Fasalka Xanaanada ilaa Fasalka 12-aad (My Ride K-12)
Hagahaaga ku saabsan xoggta gaadiidka, jadwallada, iyo ogeysiisyada.

Before You Begin
Ka Hor Inta Aadan Bilaabin

Diyaarso waxyaabaha soo socda:

1. Cinwaan iimayl oo shaqeynaya.
2. Taleefoon casri ah (smartphone), qalabka tablet-ka ama kombiyuutar leh internet.
3. Xoggta aqoonsiga ardayga ee lagu qeexay tilmaamaha dejinta CCS My Ride K-12.

Si qarsoodi ah u hayso aqoonsigaaga gelitaanka iyo xoggta aqoonsiga ilmahaaga.

Access My Ride K-12
Helitaanka Gaadiidkayga ee ku aadan Fasalada K-12 K-12

- ➔ **Qalabka moobaylka gacanta:** Ka raadi **My Ride K-12** Apple App Store ama Google Play Store oo soo dejiso ab-ka.
- ➔ **Kumbuyuutarka:** Adeegso xiriirinta (link-ga) mareegta My Ride K-12 ee lagu bixiyay farriimaha wada-xiriirka ku saabsan daah-furka ee ka yimid CCS.

1. Sameyso Akoonkaaga
    - Fur My Ride K-12 oo dooro **Isdiiwaan-geli (Sign Up).**
    - Geli cinwaanka emailkaaga, magacaaga, iyo eraygaaga sirta ah.
        - **Magaca la bixiyay (Given Name)** wuxuu ka dhigan yahay magacaaga koowaad.
        - **Magaca Qoyska (Family Name)** waxaa loola jeedaa magacaaga dambe.
2. Ka eeg iimaylkaaga farriin xaqiijinaysa akoonkaaga.
3. Dooro xiriirinta xaqiijinta si aad u hawl-geliso akoonkaaga.
4. Ku laabo My Ride K-12 oo soo gal.

Haddii aadan helin iimaylka xaqiijinta, hubi galkaaga spam-ka ama qashinka (junk) oo xaqiiji inaad cinwaankaaga iimaylka si sax ah u qortay.

1. Dooro Dugsiyada Magaalada Columbus
   Marka lagu weydiiyo inaad doorato degmo, raadi **Dugsiyada Magaalada Columbus** oo dooro gelitaanka degmada ee lagu aqoonsaday tilmaamaha dejinta CCS.
2. Ku dar ilmahaagad
   Dooro oo **Ku dar Arday**.
   Geli xoggta aqoonsiga ardayga ee laga codsaday dhalada/shaashadda, adoo adeegsanaya xoggta ay bixisay CCS.
   Raac tilmaamaha si aad u hesho oo aad ugu darto ilmahaaga.
   Xaqiiji in xoggta ardaygu sax yahay.
   Ku celi oo mari talaabooyinkan ilmo kasta oo dheeraad ah.

Haddii aadan heli karin xoggta aqoonsiga ee loo baahan yahay ama nidaamku uusan heli karin ilmahaaga, la xiriir CCS Gaadiidka (Transportation) si aad u hesho caawimo.

Review Transportation Details
Dib u eeg Faah-faahinta Gaadiidka

Dooro magaca ilmahaaga si aad u eegto xoggta gaadiidka ee ku jira akoonkaaga. Iyada oo ay ku xiran tahay qaab-dhismeedka degmada, tan waxaa ka mid noqon kara:

- Lambarka waddada loo qoondeeyay.

- Goobaha loo qoondeeyay in ardayga laga soo qaado iyo in lagu dejiyo.
- Waqtiyada la qorsheeyay ee qaadista iyo dejinta.
- Maalmaha ay waddadu shaqeyso.
- Ogeysiisyada gaadiidka iyo isbeddelada jadwalka.

Dib u eeg xoggta ilmo kasta, oo ay ku jiraan shaqooyinka subaxdii iyo galabtii marka la taxo liiska. Haddii ay wax u-muuqdaan kuwo khaldan, la xiriir CCS Gaadiidka (Transportation).

Waqtiyada gaadiidku way isbeddeli karaan sababo ah taraafikada, cimilada, ama xaalado kale oo hawlgal ah. Raac tilmaamaha CCS ee ku saabsan goorta ay tahay in ilmahaagu diyaar ku ahaado goobta loo qoondeeyey inuu ka raaco gaadiidka.

Turn On Notifications
Daar/Shid Ogeysiisyada

U-ogolow ogeysiisyada marka barnaamijku (ab-ku) uu ku weydiiyo.

Si aad goor dambe u hubiso habayntan:

1. Fur **Dejinta** taleefoonkaaga.
2. Ka raadi **Gaadiidkayga My Ride K-12** ee hoos yimaada goobaha ab-kaaga ama ogeysiisyadaada.
3. Daar ogeysiisyada.
4. Xaqiiji in fursadaha digniinta aad door bidayso ay karti u leeyihiin/ay awoodaan.

Awoodsiinta ogeysiisyadu waxay u oggolaanaysaa qalab-kaaga (your device) inuu muujiyo digniinaha gaadiidka ee lagu soo diro nidaamka. Ka hubi app-ka fariimaha degmada ee la heli karo iyo wararka cusub.

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo

Ma u baahanahay taleefoon casriga ah (smartphone)?
Maya. My Ride K-12 waxaa kale oo ay bixisaa gelitaanka mareegta/degelka internet-ka. Adeegso isku xirka shabakada ay bixiso CCS.

Ma u baahanahay gelitaanka internet-ka?
Haa Wi-Fi firfircoon ama isku xirka xoggta moobilka gacanta ayaa loo baahan yahay si loo soo saaro xoggta la cusboonaysiiyay oo loo helo ogeysiisyada ab-ka.

Qoysaska ardayda dugsiyada gaarka ah (charter school) iyo kuwa aan dawliga ahayn (nonpublic school) ma heli doonaan ogaysiis-ka-marinta mashiinka kaarka ardayga ee ku-fuulista baska (swipe-on) iyo marinta mashiinka kaarka ardayga- ee ka dagista bask (swipe-off)?
Maya wakhtigan. Ogeysiisyada xaqiijinaya marka ardaygu marsanayo mashiinka kaarka baska,ee waxaa hadda heli kara oo kaliya ardayda Dugsiyada Magaalada Columbus ee raacaya basaska Dugsiyada Magaalada Columbus.

Basaska u adeega dugsiga gaarka loo leeyahay (charter school) iyo dugsiga aan dawliga ahayn (nonpublic school) hadda ma haystaan qalabka tablet-ka ee looga baahan yahay in lagu bixiyo ogeysiisyadan. Si kastaba ha ahaatee, qoysasku wali waxay adeegsan karaan barnaamijka My Ride K-12 si ay u eegaan qiyaasaha baska ee imaatinka iyo wakhtiyada bixitaankooda.

Ma ku dari karaa wax ka badan hal cunug/hal ilmo?
Haa. Dhamaystir habka oo **Ku-darka Ardayga** ee ilmo kasta, ka dibna dooro magaca ilmaha si aad dib ugu eegto xoggtooda.

Ma u baahanahay inaan dib u cusbooneysiiyo (refresh) ab-ka?
Ab-ka si toos ah ayuu u cusboonaysiiyaa Haddii xoggtu u muuqato mid duugoowday, hubi xiriirkaaga internet-ka, ka dibna xir/demi oo dib u fur ab-ka.

Maxaa dhacaya haddii xoggta gaadiidka ilmahaygu ay khaldan tahay?
La xiriir Gaadiidka CCS. U diyaari magaca ilmahaaga, aqoonsiga ardayga, dugsiga, iyo sharaxaadda wel-welka si ay shaqaaluhu kuu caawiyaan.

Maxaa dhacaya haddii aan u baahdo caawimaad ah xagga Xarunta Xariirka Waalidka ee (Infinite Campus Parent Porta)?
Adeegso fursadaha soo kabashada akoonka ee bogga galitaanka Xariirka Waalidka (Parent Portal) ama la xiriir Taageerada Xariirka Waalidka (Parent Portal) ee CCS. Barnaamijka My Ride K-12 iyo Xarunta Albaabka Aan dhamaadka Lahayn ee (Infinite Campus) waana nidaamyo kala duwan; raac tilmaamaha soo gelida ee nidaamka aad adeegsanayso.
Ma u baahan tahay Caawin?

CCS Transportation
Gaadiidka CCS
Wixii ku saabsan hawlaha la qabanayo ee gaadiidka, jadwalka, xoggta khaldan, ama caawimaad ku saabsan isku xirka ilmahaaga ee ku aadan Barnaamijka Gaadhigayga fasalka xanaanada ilaa fasalka 12-aad (My Ride K-12):
wac 614-365-5074

CCS Parent Portal Support
Taageerada Bogga Waalidka ee CCS
Si aad u gasho akoonka Infinite Campus account access:
wac 380-997-7245
ugu dir limayl parentportal@columbus.k12.oh.us
Markaad caawimaad codsanayso, si cad u sharax arrinta. Weligaa cidna ha la wadaagin eraygaaga sirta ah (Never share your password).